# Ku xifdi caruurteena caafimaad, dugsiyadeenana kuwo ka caagan cudur.

## Taxanaha Talllaalada Dugsiyada

Si ay caruurtaadu dugsi uga galaan Ontario, waxay u baahan yihiin in laga tallaalo cudurada la isku faafiyo ee ah kuwa soo socda:

- ☑ Cudurka Maskax-labo-Biyoodka
- ☑ Qufaca Xiiqdheerta
- ☑ Jadeecada oo laga tallaalayo *caruurta dhalatay 2010 ama kadib
- ☑ Dibteeriya
- ☑ Teetanada
- ☑ Boliyo
- ☑ Qanjiro Barar (Gondalaariyo)
- ☑ Busbus
- ☑ Umulow

Ontario dhexdeeda, duritaanadaan waxaa lagu bixiyaa **lacag la'aan.**

Duritaano dheeri ah oo lagu taliyey ka eeg Jadwalka Tallaalada Ontario ee ontario.ca/vaccines.

**Waxay nagu qaadaysaa in aan kulligeen is wada ilaalino.**
Markaad tallaasho caruurtaada, waxaad iyaga iyo weliba caruuraha kale ee la joogaba ka ilaalisay cudurro halis badan.

## Ha moogaanin Jadwalka Tallaalada Ontario

Waalid ahaan, caafimaad xifdinta iyo ammaan dhawrka caruurtaadu waa mudnaantaada koowaad. Dhammaan caruurta da'doodu udhexayso 4 ilaa 17 ee dugsiyada gelayaa waxay u baahan yihiin in la tallaalo iyada oo loo eegayo Jadwalka Tallaalada Ontario. Tallaalku waxa uu caruurta ka ilaaliyaa cudurro faro badan oo si fudud la isugu faafiyo marka dugsiyada la joogo.

Sida uu qabo qodobka Tallaalka Ciyaal Iskuulka, caruurta waxaa laga rabaa caddayn inay ka tallaalan yihiin cudurada Dibteeriya, Teetanada, Boliyo, Qanjiro Barar (Gondalaariyo), Busbuska, Umulow, Xiiq dheerta, caruuta dhalatay 2010 iyo wixii ka dambeeyeyna si ay u galaan iskuul waa inay ka tallaalan yihiin Jadeecada. Caruurta aan si buuxda loo tallaalin looma ogolaado inay galaan iskuul.

### Waxaad u baahan tahay inaad samayso

Ka hubso kaaliyahaaga caafimaad ama laanta caafimaadka ee xaafadaada inay caruurtaadu wada heleen tallaalada looga baahan yahay si ay iskuul u galaan. Hadduu cunugaagu qaatay dhammaan jadwalka tallaaladaas wax tallaal dambe ah uma baahna.

Ma ogtahay in ay waajibkaaga tahay in aad u soo sheegto laanta caafimaadka ee xaafadaada diiwaangelinta tallaalada ilmahaaga? Kaaliayahaaga Caafimaad kuuma gudbinayo diiwaangelintaas. Si aad u hesho laanta caafimaadka ee xaafadaada, ama akhbaaro kale oo dheeri ah, booqo ontario.ca/vaccines.



### Barashada Tallaalada

Waalidiintu waxay ubaahanayaan in ay soo dhamaystaan xalaqooyin lagu barano tallaalada, haday doonayaan in caruurtooda laga saamaxo tallaalada looga baahan yahay ee aan la xiriirin arimaha caafimaadka.



Ontario

# In ka badan 200 oo sano, duriinadu waxay adduunka ku badbaadinayeen nafo badan!
# Hel durriinka oo ka badbaadi qoyskaaga cudurada soo socda.

## Qufaca Xiiqdheerta

Qufaca Xiiqdheertu waa cudur la is qaadsiiyo oo caruurta, kurayada iyo dadka waa weyn ku sababa qufac feeraha ka soo go'a neeftana ku celiya oo muddo dheer socda. Qufaca Xiiqdheertu khatar dheeri ah ayuu ku noqon karaa ilmaha muluqyada ah. Qufacaani matag ama neef xiran muddo gaaban ah ayuu ilmaha ku keeni karaa. Waxa kale oo uu sababi karaa cuduro halis ah sida xanuunka laabxuunshaha, iyo weliba dhaawac maskaxeedka iyo qallalka caruurta ku dhaca.

## Jadeecada

Jadeecadu waa cudur la is qaadsiiyo oo sababi kara daal badan, madax xanuun yar, qandho gaaraysa ilaa 39° C, dhaxan iyo xanuunka murqaha iyo kala goysyada qabta maalin iyo labo ka hor intaysan bilaaban finiinicyo guduudan, cuncunya, oo soo fufaya. Marka uu xumaado furuq digaagu waxa uu nqoon karaa mid khatar ah waxaana raaci kara bakteeriyada boogaha maqaarka, boogaha dhegaha, iyo xanuunka xabadka iyo laabxuunshada.

## Cudurka Maskax-labo-Biyoodka

Infakshanka maskax-Biyood waxa uu sababi karaa cuduro aad u halis ah, ooy ku jiraan maanjeestiga. Maanjeestigu waa infakshan aad u halis ah, kaas oo ku dhaca dadka ama ku dhashay ama iyaga oo fayow taabtay qof cudurkaas qaba ama qof hide-side cudurkaas ah.

Cudurka maskax-Biyoodku waxa kale oo uu sumayn karaa dhiigga, waxa uuna infakshan ku dhalin karaa maskaxda iyo laf dhabarta.

## Teetanada

Teetanada ama Af-xiranku waa cudur aad u halis ah, kaas oo ka dhasha haddii ay wasakh teetane wadataa gasho maqaarka jirka. Waxa uu murqaha ku sababaa xanuun kulul oo ku soo booddo ah iyo jir dubaaxin aad u khatara.

## Dibteeriya

Infakshan ku dhaca madaxa, sanka, dhuunta, iyo maqaarka. Waxa uu keenaa dhuun xanuun, dhaxan, iyo qandho. Infakshankaani waxa uu noqon karaa mid mushkilad ku keena neefsiga oo ur loo bixin waayo, wadnaha oo istaaga iyo nabaro neerfaha ku dhaca.

## Boliyo

Boliyo waa cudur aad u khatar ah oo ay dadku ka qaadi karaan cabitaanka ama cunitaanka dheef uu jeermiska boliyo ku jiro. Waxa kale oo uu ku fidi karaa in qof qabaa uu qof aan qabin gaarsiiyo. Boliyo waxa uu nabarayn karaa neerfaha, cuuryaamin joogto ah ku keeni karaa qof, balsde wuuba dili karaa.

## Qanjiro Barar (Gondalaariyo)

Cuno beelka Qaama Qaashow waa cudur xun oo lagu kala qaado jeermis wuxuuna wataa qandho, madax xanuun iyo weliba dhabanada oo barara, qanjirada iyo qoorta. Waxay sababi kartaa caafimaad darro xun sida dhego-beel iyo xanuunka maskax bararka.

## Busbus

Busbus waa infakshan si baahsan la isu qaadsiiyo. Wuxuu dhalisaa qandho daran, qufac, finiinicyo, duuf dareera iyo indho guduud. Busbusku waxa uu dhalin karaa xanuuno halis ah sida dhego malaxaysi iyo niimooniya.

## Umulow

Umulow waa cudur halis ah oo la is qaadsiiyo kana dhasha jeermis. Umulow waxa uu keenaa qandho, nabaro soo fufa, madax xanuun, xoogaa san goror ah, iyo indho guduud (barar indhoxamilnimo ah). Wuxu haweenta uurka leh iyo uur-ku-jirkeedaba ku keeni karaa caafimaad darro xun, dadka waa weyna roomaatiisimo.

**Ogaysiin Muhim ah:**

**Ardayda aan faylkooda laanta caafimaadka ee xaafadooda ku haysan tallaalo dhamaystiran waxaa laga yaabaa in iskuulka laga soo cayriyo ilaa diiwaanka tallaalkooda oo dhamaystiran laga keeno.**

**La xiriir laanta caafimaadka ee xaafadaada si aad uga war bixiso diiwaanka tallaalka cunugaaga.**

Hadduu cunugaagu u baahan yahay in laga saamaxo tallaal, fadlan la hadal laanta caafimaadka ee xaafadaada. Ogow hade, caruurtaas laga saamaxay tallaal in ay khatar dheeri ah ku jiraan iyo inay suurto gal tahay in iskuulka laga saaro markuu cudur ka dillaaco halkaa.

Catalogue No. 026969 ISBN 978-1-4868-3282-8 (PDF) March 2019 © Queen's Printer of Ontario 2019